STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF LICENSING
PO Box 9020 • Olympia, Washington 98507-9020

<<Date>> (Format: Month Day, Year)

Koodhka Ka shaqaysiinta: XXXXXX

<<First Name>> <<Last Name>>
<<Address>>
<<City>>, <<State>> <<Zip>>

Ujeedo: Ogaysiis Muhiim ah oo La xariira Amaanka Xogta kana yimid Waaxda Ruqsadaha ee Washington (Washington Department of Licensing)

Mudane/Marwo <<First Name>> <<Last Name>>,

Waxaad helaysaa waraaqdaan waayo waxaad haysataa ruqsada ganacsiga ama shaqada ama waxaad xog siisay Nidaamka Ruqsada Ganacsiga iyo Shaqada ("B & P" System) oo ay Maamusho Waaxda Ruqsadaha ee Gobalka Washington (Department of Licensing, "DOL"). Nidaamka B&P waxaa ku jira xogta ruqsadaha ay baxshaan labadaba DOL iyo Gudigga Diiwaan Gelinta Injineerada Xirfadleeyda ah iyo Kormeerayaasha Dhulka (Board of Registration for Professional Engineers & Land Surveyors, BRPLES).

DOL ayaa go'aamisay in xogta gaarka ah ee ku qoran diiwaankaaga ruqsada ee Nidaamka B&P lagula kacay fal sharci daro ah. Ayadoo ku xiran nooca ruqsada aad haysato, xogta faaftay waxaa ku jiri kara magacaaga, ciwanakaaga iimeelka, lambarka social security, taariikhda dhalashada, iyo lambarka ruqsada darawalka. Intaan wadno baaritaanka sida dhacdadu ku timid, waxaa aad muhiim u ah inaan ku siino ogaysiiskaan si degdeg ah. Si ay nooga caawiso ilaalinta xogtaada, waxaan ku siinaynaa hal sano oo la socoshada hufnaanta daynta iyo adeegyada kahortaga xatooyada aqoonsiga.

Maxaa Dhacay?
Markay ahayd Janaayo 24, 2022, DOL ayaa ka war heshay in xog, u muuqata inay ka timid nidaamka B&P, la galay ayadoon fasax loo haysan. Waxaan isla markiiba wada ka saarnay Nidaamka B&P waxaana u dignay adeeg bixiyaasha doorka ku leh xogta lagu hayo Nidaamka B&P. Waxaan biloownay baaritaan adag oon ku samaynayno qaabka arintaani ku dhacday waxaana la xariirnay khabiir amaanka oonleenka ah oo aqoonsi qaran haysta si uu u sameeyo qiimaynta faahfaahsan ee agabka oonleenka ah.

Lama helin fal laga shakiyo oo loo gaystay nidaam kale oo kasta oo DOL ay maamusho, ayna ku jiraan nidaamka ruqsada darawallada iyo gaadiidka, kuwaasoo dhammaan si dhow aan isha ugu hayno.

Xog noocee ah ayaa qayb ka ahayn?
Waxaan ogaanay in xogta gaarka ah ee ku jirta diiwaankaaga DOL ee ruqsada shaqada ama ganacsiga uu gacanta ku dhigay qof aan fasax u haysan. Ayadoo ku xiran nooca ruqsada aad haysato, xogta falku sameeyay waxaa ku jiri kara magacaaga, ciwanakaaga iimeelka, lambarka social security, taariikhda dhalashada, iyo lambarka ruqsada darawalka.

Maxaan Samaynaynaa?
DOL ayaa isla markiiba hawada ka saartay Nidaamka B&P si loo difaaco xogta ruqsadleeyda nidamakeena shaqada iyo ganacsiga. Waxaan la shaqaynaynaa adeeg bixiyaasheena, Washington Technology Solutions (WaTech), iyo khabiir dhanka amaanka kumbuyuutarada ah oo heer qaran aqoonsi ka haysta si ay baaritaan adag ugu sameeyaan dhacdada. Ciidanka booliiska ayaa sidoo kale la wargeliyay. Baaritaanka ayaa naga caawinaaya inaan go'aamino meesha uu ka yimid falkaan sharci darada ah iyo shaqsiyaadka uu saamaynta ku yeelan karo, si aan u caawino dadkaas. Waxan dhaqan gelinaynaa difaacyo dheeraad ah si aan u difaacno nidamaka B&P. Sida ugu dhakhsaha badan markay badqab tahay ayna haboon tahay, Nidamaka B&P ayaa khadka oonleenka dib loogusoo celin doonaa.

Si aan u yarayno ruqsadleeyda ay dhaceen ruqsadahoodu intii aan hawada ka maqnayn, waxaan si otomaatig ah meesha uga saaraynaa ganaaciyada dib u dhaca codsiga anagoo gaarsiinayna ilaa Abriil 1, 2022. Waxaa intaas dheer, waxaan dhaqan gelinaynaa habraacyo si aan usii wadno shaqada cusboonaysiinnada u joogsaday khad ka saarida nidaamka awgiis si degdeg ah. Si aad u hesho xogta faahfaahsan ee la xariirta su'aalaha aan laga jawabain ee ruqsada, fadlan booqo webseedkeena oo ah: www.dol.wa.gov/outage.

Maxaan Ku Talinaynaa
Waxaan aad u ilaalinaa amaanka xogta gaarka ah ee ruqsadleeydu nagu aamineen. Waraaqdaan waxaa ku jira tlmaamo gaar ah oo ku aadan sida la iskaga diiwaan gasho hanaanka la socoshada daynta ee Experian, waxaana kugu boorinaynaa inaad ka faa'iidaysato hanaanka la socoshada iyo adeegga soo celinta aqoonsiga ee Experian, kuwaasoo aad si bilaash ah ku helayso.

Waxaan aad uga xunnahay walaaca iyo niyad xumada ay arintaani kugu keeni karto. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan nagalasoo xariir xarunteena wicitaanka ood ka helayso (855) 568-2160 Isniinta-Jimcada 8:00 AM – 5:00 PM Waqtiga Baasifiga ama booqo www.dol.wa.gov/outage.

Daacadnimo,

Washington State Department of Licensing
P.O. Box 9020
Olympia, Washington 98507-9020

ADEEGYADA SOO CELINTA AQOONSIGA—
LOOMA BAAHNA ISDIIWAAN GELIN

Caawimaada Soo celinta Aqoonsiga ayaad si degdeg ah uga helaysaa Experian. Uma baahnid inaad isdiiwaan geliso. Haddii aad aaminsan tahay in si tuugnimo ah loo isticmaalay xogtaad dhacdadaan awgeed aadna doonayso inaad nagala hadasho sida aad ku xalin karto ciladahaas, fadlan la xariir wakiil ka tirsan Experian. U diyaar garoow inaad na siiso **lambarka aqoonsiga** <<b2b_ text_2(engagement number)>> oo ah cadaynta muujinaysa inaad u qalanto adeegyada Soo celinta Aqoonsiga ee Experian.

Haddii, kadib markaad kala hadasho xaaladaada wakiilka, la go'aanso in soo celinta aqoonsigu loo baahan yaay, markaas wakiilka Soo celinta Aqoonsiga ee Experian ayaa kaala shaqayn doona baarista iyo xalinta dhacdo kasta oo tuugnimo oo ka timid taariikhda dhacdada (ayna ku jiraan, sida ku haboon, inuu kaa caawiyo la xariirida shirkadaha daynta bixiya si aad uga dodo qarashaadka loona xiro koontiyada kiiska; inuu kaa caawiyo xayiraad saarida faylkaaga daynta ee ay hayaan sadexda shirkadood ee ugu waawayn daymaha; iyo inuu kaa caawiyo la xariirida wakaaladaha dawlada si ay kaaga caawiyaan la xariirida wakaaladaha dawlada si ay kaaga caawiyaan kusoo celinta aqoonsigaaga siduu markii hore ahaa.)

Fadlan ogoow in adeegga Soo celinta Aqoonsiga aad heli karto muddo hal sano ah laga bilaabo taariikhda waraaqdaan uusana kaa doonayn inaad wax talaabo ah qaado dhankaaga waqti xaadirkaan. Shuruudaha iyo Xeerarka yaboohaan ayaa ku qoran barta www.ExperianIDWorks.com/restoration .

SIDA LA ISKAGA DIIWAAN GASHO EXPERIAN IDENTITYWORKS

Sida la Isku diiwaan gasho

Waxaan kugu boorinaynaa inaad ka shaqaysiiso agabka sheega tuugada ood ka helayso Experian IdentityWorks oo ah biloowga xubinimada hal sano. Qalabkaan wuxuu ku siinayaa sheegida aqoonsiga iyo xalinta xatooyada aqoonsiga. Si aad u biloowdo la socoshada xogtaada gaarka ah, fadlan raac talaabooyinka hoose:

- Xaqiiji inaad **isdiiwaan geliso ugu danbayn Maayo 24, 2022.** (Koodhkaaga ayaan shaqayn doonin taariikhdaan kadib.)
- **Booqo** webseedka Experian IdentityWorks si aad isku diiwaan geliso: https://experianidworks.com/3bcredit
- Sheeg **koodhkaaga ka shaqaysiinta**: <<activation code s_n>>
- Keen **lambarkaaga heshiiska**: <<b2b_text_2(engagement number)>>

Haddii aad su'aalo ka qabto qalabkaan, u baahan tahay caawimaad ku aadan Soo celinta Aqoonsiga oo ka dhalatay dhacdadaan ama aad doonayso qaab kale ood iskaga diiwaan geliso Experian IdentityWorks si oonleen ah, fadlan la xariir kooxda adeegga macaamiisha ee Experian ood ka wacayso 1-877-288-8057 ugu danbayn **Maayo 24, 2022**. U diyaar garoow inaad na siiso lambarka aqoonsiga <<b2b_text_2(engagement number)>> oo ah cadaynta muujinaysa inaad u qalanto adeegyada Soo celinta Aqoonsiga ee Experian.

Faahfaahin Dheeraad ah oo La xariirta Xubinimadaada Halka sano ah ee Experian Identityworks

Kaarka daynta looma baahna si aad iskaga diiwaan geliso Experian Identityworks. Waxaad la xariiri kartaa Experian isla markaba si aad uga waranto cilado kasta oo tuugo, aadna u hesho adeegyada soo socda marka aad iska diiwaan geliso Experian Identityworks:

- **Warbixinta daynta ee Experian ood helayso xiliga isdiiwaan gelinta:** Arag nooca xogta ku jirta galkaaga daynta. Warbixinnada maalinlaha ah ee daynta ayaa ayay ka helayaan oonleenka xubnaha barnaamijka keliya.*
- **La socoshada Daynta:** Wuxuu si joogto ah ula soconayaa diiwaannada Experian, Equifax iyo Transunion si loo baaro in tuugo gashay.
- **Soo celinta Aqoonsiga:** Khubarada Soo celinta Aqoonsiga ayaa isla markaba diyaar u ah inay kaa caawiyaan xal u helida falalka tuugada ah ee la xariira daynta iyo kuwa aan ahayn daynta.
- **Experian IdentityWorks ExtendCARE™:** Waxaad helaysa isla taageerada heerka sare ah ee Soo celinta Aqoonsiga xataa haddii xubinimadaada Experian Identityworks ay dhamaatay.

- **Caymis dhan $1 milyan oo loogu talagalay XalintaTuugada Aqoonsiga**:** Wuxuu bixinayaa daboolid ku aadan qarashaadka qaarkood iyo lacagaha tuugadu **oonleenka** ku xado.

TALAABOOYIN DHEERAAD AH SI LAGAAGA CAAWIYO DIFAACA XOGTAADA GAARKA AH

Akhri Bayaanka Koontadaada oo u sheeg Laamaha Sharci Fulinta Fal kasta ood ka Shakido: Si ay u noqoto talaabo kahortag ah, waxaan ku talinaynaa inaad is ilaaliso aadna akhrido bayaanka koontadaada iyo warbixinnada daynta markasta. Haddii aad aragto fal aad ka shakido, waa inaad si degdeg ah ugu sheegtaa bangiga ama shirkada dhaqaalaha ee koontadaada haysa. Waa inaad sidoo kale si degdeg ah ugu sheegtaa fal kasta oo tuugo ah ama aad ka shakiday in lagu xaday aqoonsi laamaha sharciga ee ay qusayso, garyaqaanka guud ee gobalkaaga, iyo/ama Gudigga Ganacsiga ee Federaalka (Federal Trade Commission, “FTC”).

Nuqulka Warbixinta Daynta: Waxaad nuqulka bilaashka ah ee warbixinta daynta ka heli kartaa mid kasta oo kamid ah sadexda wakaaladood e ugu waawayn diiwaanka daynta halmar 12 kii bilood kasta adoo booqanaaya www.annualcreditreport.com/ wacaaya laynka bilaashka ah 877-322-8228, ama buuxinaaya Foomka Codsiga Warbixin Sanadeedka Daynta kadibna boostada ugu diraaya Annual Credit Report Request Service, P.O. Box 105281, Atlanta, GA 30348. Waxaad sidoo kale la xariiri kartaa mid kamid ah sadexda wakaaladood ee soo socda ee qaran ee warbixinta daynta:

Equifax	**Experian**	**TransUnion**
P.O. Box 105851 Atlanta, GA 30348 1-800-525-6285	P.O. Box 9532 Allen, TX 75013 1-888-397-3742	P.O. Box 1000 Chester, PA 19016 1-877-322-8228
www.equifax.com	www.experian.com	www.transunion.com

Digniinta Tuugada: Waxaad iskudayi kartaa inaad digniinta tuugada ku xirato warbixintaada daynta. Digniinta hore ee tuugada ayaa ah bilaash waxayna ku shaqayn doontaa diiwaankaaga daynta muddo hal sano ah. Digniintu waxay u sheegaysaa dayn bixiyaasha in fal tuugo ah uu ka dhex muuqdo warbixintaada wuxuuna codsanayaa in dayn bixiyuhu kulasoo xariiro kahor intuusan wax koonto ah ku furin magacaaga. Si aad ugu xirto digniinta tuugada warbixintaada daynta, la xariir midkood sadexda shirkadood ee ugu waawayn wargelinta daynta ee kor lagu sheegay. Xog dheeraad ah ayaad ka helaysaa www.annualcreditreport.com.

Xanibaada Amaanka: Waxaad xaq u leedahay inaad xanibaada amaanka saarto diiwaankaaga daynta. Tani waxay ka hortagaysaa in lagu furto magacaaga adoon si rasmi ah u ogolaan. Xanibaada amaanka waxaa loo sameeyay in looga hor istaato dayn bixiyaasha inay galaan warbixinta dayntaada adoon u ogolaan. Sababtaas awgeed, adeegsiga xanibaada daynta ayaa carqalad ku noqon karta ama dib u dhac ku keeni karta awoodaada helitaanka daynta. Waa inaad si gaar ah u saartaa xanibaada daynta diiwaankaaga daynta ee shirkad kasta oo daynta ka warbixisa. Ma jiro qarash kaaga baxaaya saarida, ka qaadista ama bixinta xanibaada amaanka. Si aad u saarto xanibaada amaanka, waxaa lagaa codsan karaa inaad siiso wakaalada warbixinta macaamiisha xog ku aqoonsanaysa, ayna ku jiraan magacaaga buuxa, lambarka Social Security, taariikhda dhalashada, ciwaannada hadda iyo kuwii hore, nuqulka kaarkaaga aqoonsiga gobalka, iyo biilka dhawaan ee adeegga guriga, bayaanka baanka ama bayaanka caymiska.

Ilaha Dheeraadka ah ee Bilaashka ah: Waxaad xog ka heli kartaa wakaalada warbixinta macmiilka, FTC, ama Garyqaanka Guud ee Gobalka taasoo ku saabsan talaabooyinka aad qaadi karto si aad uga hortagto tuugada aqoonsiga. Waxaad u sheegi kartaa xatooyada aqoonsiga ee aad ka shakiday laamaha sharciga, ayna ku jiraan FTC ama Garyaqaanka Guud ee Gobalkaaga.

Gudigga Ganacsiga ee Federaalka (FTC): FTC waxaa lagala xariiri karaa: 600 Pennsylvania Avenue NW, Washington, DC 20580; www.identitytheft.gov; 1-877-ID-THEFT (1-877-438-4338); iyo, TTY: 1-866-653-4261.Gudigga Ganacsiga ee Federaalka waxay ku boorinayaan dadka ogaada in xogtooda si khaldan loo isticmaalay inay cabsho u dirana gudigga sida lagu sharxay webseedkooda. Waxaad xaq u leedahay inaad warbixinta booliiska gudbiso haddii aad marna waajahdo xatooyada aqoonsiga ama khiyaano. Fadlan ogoow in si aad u gudbiso warbixinta booliiska ee la xariirta tuugada aqoonsiga, in lagaaga baahan doono inaad keento cadayn muujinaysa in aad tahay dhibane. Tusaaleyaasha

xatooyada la ogyahay ama laga shakiyay ee aqoonsiga waa in sidoo kale loo gudbiyaa laamaha sharciga iyo Garyaqaanka guud ee Gobalkaaga.

Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta (Fair Credit Reporting Act, FCRA): Waxaad xaq u leedahay sida ku cad Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta, sida xaqa aad u leedahay in laguu sheego haddii xog ku jirta galkaaga daynta loo adeegsaday talaabo kaa dhan ah, xaqa aad u leedahay inaad ogaato waxa ku qoran diiwaankaaga daynta, xaqa aad u leedahay inaad codsato hormarka aad ka gaartay daynta, iyo xaqa aad u leedahay inaad dood ka keento xogta kala dhiman ama khaldan. Waxaa intaas dheer, sida ku cad Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta, wakaaladaha warbixinta macaamiishu waa inay saxaan ama tiraan xogta khaldan, kala dhiman, ama aan la cadayn karin; wakaaladaha warbixnta macmiilku masoo sheegi karaan xogta xun ee waqtigeedii lasoo dhaafay; ma gelitaanka diiwaankaaga waa mid xadidan; waa inaad siisaa ogolaanshahaaga warbixinnada daynta si loo siiyo loo shaqeeyaasha; waxaad yarayn kartaa yaboohyada "horay loo hubiyay" ee daynta iyo caymiska aad hesho ayadoo lagu salaynaayo xogta ku qoran warbixintaada daynta; waxaadna ka codsan kartaa magdhow dadka jebiya sharuudahaan. Waxaad heli kartaa xaquuqo dheeraad ah ood ku helayso Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta oon halkaan ku qornayn. Dadka aqoonsigooda la xaday iyo shaqaalaha ciidanka milatariga shaqaynaaya ayaa leh xaquuqo gaar ah oo dheeraad ah oo ku qoran Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta. Waxaan kugu boorinaynaa inaad akhrido xaquuqdaada ku cad Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta adoo booqanaaya www.consumerfinance.gov/f/201504_cfpb_summary_your-rights-under-fcra.pdf, ama adoo qorala u diraaya Xarunta Jawaab Celinta Macmiilka, Qolka 130-A, Federal Trade Commission, 600 Pennsylvania Ave. N.W., Washington, D.C. 20580.

Dadka dagan California: Waxaad booqan kartaa Xafiiska Difaaca Sirta ee California ood ka helayso www.oag.ca.gov/privacy si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan difaaca ka dhanka ah xatooyada aqoonsiga.

Dadka dagan Kentucky: Waxaad la xariiri kartaa Garyqaanka Guud ee Gobalka ood ka helayso Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Kentucky, Frankfort, Kentucky 40601; 502-696-5300; ama booqo www.ag.ky.gov.

Dadka dagan Maryland: Waxaad kala xariiri kartaa Garyaqaanka Guud ee Gobalka laynta 200 St. Paul Place, 16th Floor, Baltimore, MD 21202; bilaash aad uga wacayso 1-888-743-0023; khadka taleefanka (410) 576-6300; laynka macaamiisha (410) 528-8662; iyo barta oonleenka ah www.marylandattorneygeneral.gov.

Dadka dagan New Mexico: Waxaad xaq u leedahay sida ku cad Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta, sida xaqa aad u leedahay in laguu sheego haddii xog ku jirta galkaaga daynta loo adeegsaday talaabo kaa dhan ah, xaqa aad u leedahay inaad ogaato waxa ku qoran diiwaankaaga daynta, xaqa aad u leedahay inaad codsato hormarka aad ka gaartay daynta, iyo xaqa aad u leedahay inaad dood ka keento xogta kala dhiman ama khaldan. Waxaa intaas dheer, sida ku cad Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta, wakaaladaha warbixinta macaamiishu waa inay saxaan ama tiraan xogta khaldan, kala dhiman, ama aan la cadayn karin; wakaaladaha warbixnta macmiilku masoo sheegi karaan xogta xun ee waqtigeedii lasoo dhaafay; ma gelitaanka diiwaankaaga waa mid xadidan; waa inaad siisaa ogolaanshahaaga warbixinnada daynta si loo siiyo loo shaqeeyaasha; waxaad yarayn kartaa yaboohyada "horay loo hubiyay" ee daynta iyo caymiska aad hesho ayadoo lagu salaynaayo xogta ku qoran warbixintaada daynta; waxaadna ka codsan kartaa magdhow dadka jebiya sharuudahaan. Waxaad heli kartaa xaquuqo dheeraad ah ood ku helayso Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta oon halkaan ku qornayn. Dadka aqoonsigooda la xaday iyo shaqaalaha ciidanka milatariga shaqaynaaya ayaa leh xaquuqo gaar ah oo dheeraad ah oo ku qoran Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta. Waxaan kugu boorinaynaa inaad akhrido xaquuqdaada ku cad Sharciga Wargelinta Cadaalada ah ee Daynta adoo booqanaaya www.consumerfinance.gov/f/201504_cfpb_summary_your-rights-under-fcra.pdf, ama adoo qorala u diraaya Xarunta Jawaab Celinta Macmiilka, Qolka 130-A, Federal Trade Commission, 600 Pennsylvania Ave. N.W., Washington, D.C. 20580.

Dadka dagan North Carolina: Waxaad kala xariiri kartaa Garyaqaanka guud ee Gobalka lambarka 9001 Mail Service Center, Raleigh, NC 27699-9001, 1-877-566-7226 ama 1-919-716-6400, www.ncdoj.gov. Waxaad helaysaa xogta ka timaada Garyaqaanka guud ama Gudigga Ganacsiga ee Federaalka oo ku saabsan kahortaga tuugada aqoonsiga.

Dadka dagan Oregon: Waxaad kala xariiri kartaa Garyaqaanka Guud ee Gobalka Waaxda Cadaallada ee Oregon (Oregon Department of Justice), 1162 Court Street NE, Salem, OR 97301-4096; 877-877-9392; iyo barta oonleenka ah https://www.doj.state.or.us/.